# Aannu in yar oo kale u samayno Bristol

Dib-u-warshadee wax badan oo Bristol ah. Meel kasta oo aad ka joogto magaalada, aannu dib-u-warshadayno wax badan

**Aannu dib-u-warshadayno wax badan!**

In ka badan kala-bar waxa ku jira qashinka caadiga ah ee madow ayaa dib loo warshadayn karay. In ka badan boqolkiiba shan iyo labaatan waa cunto.* Marka aannu qaadanno daqiiqad dheeri ah si aan alaabta ugu ridno weelka dib-u-warshadaynta saxa ah, waxaannu wada ka samayn karnaa isbeddel weyn Bristol.

**Waa maxay sababta dib-u-warshadayntu ay muhiim u tahay?**

Way u wanagsa tahay dhulka, marka aannu dib u warshadayno wax badan, waxay yaraynaysaa qarashka cashuur-bixiyaha golaha deegaanka. Taas macnaheedu waa lacag badan oo lagu qarash gareeyo adeegyada kale ee muhiimka ah ayaa la helayaa.

## Aaway dib-u-warshadayntaydu?

Ururinta kaddib waxaa loo qaadaa xaruntena kala wareejinta ku taalla Albert Road iyo xarunteenna dib-u-warshadaynta alaabta eku taalla Avonmouth. Marka la kala sooco oo la xirxiro waxay u tagtaa shirkado takhasus gaar ah leh ('dib-u-habeeyayaal') ka hor inta aan loo beddelin wax cusub - ama haddii ay tahay cunto waxay u beddeshaa tamarta cagaaran oo guryaha loogu talaggalay iyo nafaqeeyaha ciidda beeraha.

## Alaabada aan ka jirin adeegga waddooyinka

Tag bogga Internetka ee golaha deegaanka si aad u qabsayo ballan ururinta qashinka waaweyn ama beerta ama booqo xaruntaada dib-u-warshadaynta ee deegaankaaga.

## Ma ogtahay?

1 diirka muuska oo dib loo warshadeeyay wuxuu soo saaraa tamar ku filan oo lagu cabbeeyo 2 taleefan oo gacanta ah!

Sawir koodhka QR si aad u hesho macluumaadka #RecycleMore iyo talooyinka ugu muhiimsan

*Falanqaynta Hal-abuurka Qashinka Bristol 2025

# Dib-u-warshadee wax badan  Bristol

## Bacda cas

**Caag iyo bir**

- Gasacadaha – la socda oo la jajabiyay
- Dhalooyinka caagga ah – la socda oo la jajabiyay
- Daboollada iyo furarka – daboollada dhalooyinka, furarka dhalooyinka
- Biifbaafta  – madhan iyadoo daboollo aan lahayny
- Baakadaha caagga ah – saxaaradaha cuntada ee la raaciyay (caag madow ma jiro)

## Bac buluug ah

**Kartoon, waraaqo iyo kartoonnada wax lagu xidho**

- Sanduuqyada – ka saar cajaladda, simi oo laab
- Kartoonada – la raaciyay oo la jajabiyay
- Warqadaha – dhammaan warqadaha iyo majaladaha
- Tuubooyinka kartoonka ah
- Kaararka salaanta (aan lahayn dhaldhalaal)

Ka saar cajaladda, simi oo laab si ay ugu habboonaato bacda. (Ma jiro kartoon leh cunto, sida sanduuqyada pizza-ha ee wasakhaysan, ma jiro warqad duub ah iyo koobabka cabitaanka ee la qaato)

## Qashinka bunni ah

**Dhammaan cuntooyinka la kariyey iyo kuwa aan la karin**

- Miraha iyo khudaarta, oo ay ku jiraan qolofta
- Farmaajada  iyo caanaha
- Hambada
- Hilib, kalluun, lafo iyo qolofka ukunta
- Rooti, baasto, bariis iyo badar
- Haraaga qaxwaha iyo bacaha shaaha

Waxaad isticmaali kartaa wargeys, bacda cuntada iyo qashinka beerta  ama waxad dib u isticmaali kartaa bac hore oo wax lagu qaado ama bacda rootiga/khudaarta, si aad u daboosho weelkaaga cuntada iyo qashinka. (Ha ku darin wax baakado ah oo ay ku jiraan  bacda cuntada la tuurayo)

## Sanduuqa madow

**Dhalo (dhalo jabay ma jiro)**

- Dhalooyinka quraaradaha ah
- Weelasha quraaradaha ah

La tuurayo  (dabool la'aan - kuwan waxaa la geliyaa bacda cas)

## Batariyada/vapes-ka iyo qalabka korontada ee yaryar

- Ku rid  batariyada/vapes-ka iyo qalabka korontada ee yaryar bacaha gaarka ah iyagooo aan xinayn kana korreeya qashinka kale oo dib loo warshadeeyo ee ku jira sanduuqaaga madow

In aad batariyadaada/vapes-kaaga ka dhigto kuwo ka gaar ah qalabka korontada ee yaryar tusaale ahaan, kiliyaha, toostariyada, iyo kontaroolayaasha ciyaaraha, waa muhiim. Tani waxay ka dhigan tahay in shaqaalaheennu ay si badbaado leh u ururin karaan oo ay yaraynaysaa khatarta dabka

Hubi in qashinkaaga iyo weelashaada si sax ah loo kala soocay oo ay diyaar u yihiin in la qaado 6-da subaxnimo

Ma doonaysaa inaad wax badan ka ogaato weelashaada iyo sida loo warshadeeyo waxyaabo badan?

Sawir ka qaad summadda can the QR code! bristolwastecompany.co.uk/ recycle-more

OFFICIAL